



S & J: Xukunkii Maxkamadda Sare ee Sharciga ee Dugsi Dadwaynaha Madaxa Bannaan [Charter School]

Illaa iyo intii Maxkamadda Sare ee Gobolku ay soo saartay xukunkeeda ku saabsanaa charter schools fiidkii Jimcihii la soo dhaafay, waxaan dhammaantayo mashquul ku ahayn sidii aan u fahmi lahayn faahfaahinta go'aanka iyo saamaynta ay ku leedahay carruurta gaaraysa ilaa 1,300 arday ee horayba u dhiganaysay dugsiyada charter schools.

Waxaan haddaba rabnaa inaan idinka siinno jawaabo qaarkood oo ku saabsan su'aalaha inta badan aan ka helnay qoysaska dowladii maalmood ee la soo dhaafay.

S: Maxay Maxkamaddu u xukuntay inay dugsiyada dadwaynaha ee Washington's public charter schools ay yihiin kuwo dastuurka ka baxsan?

J: Maxkamadda ayaa xukuntay inuu sharciga dugsi charter schools ee dadwaynaha Washington u dastuurka ka baxsan yahay sababta oo ah xeer qarni-jireen ah oo dhahay inayna dugsiyada charter school dadwaynuhu heli karin raasamaalynta dowladda sababta oo ah ma aha "dugsiyo loo dhan yahay" (dugsiyo dadwayane) oo doorta xubnaha guddiga dugsiyada.

Hase yeeshe, xeerka dugsi charter schools dadwaynaha ayay ansixiyeen cod-bixiyeyaasha Washington gudihii 2012, oo xeerka ayaa ka mid ah kuwa ugu xoogga badan qaranka. Dugsiyada charter schools ee dadwaynaha ayaa qanciya shuruudaha looga baahan yahay iyo tallaabooyin la-xisaabtan ka sii adag marka loo eego dugsiyada kale ee dadwaynaha, iyada oo ay u dheer tahay inay leeyihiin dabacsanaan ay shakhsiyeyaan waxbarista si ay ula kulmaan baahida shaqsi kasta oo arday ah.


Iyada oo la isticmaalo micnaysiga Maxkamadda, barnaamijyada sida Running Start (barnaamij koorsooyin tacliin sare siiya ardayda dugsiyada sare) iyo dugsiyada Tribal Compact Schools ee loogu talagalay ardayda dadka dalka asalka ku ahaa ayaan markaa waxa ka dambeeya heli doonin lacagaha dowladda sababta oo ah iyaguna ma leh guddiyo dugsi la dooratay.

Si aan si fiican ugu qeexno: maxkamadda ayaan xukunka ku samayn iyada salka ku haysa u mudnaan, tayada, ama waxqabadka dugsiyo jaartar dadwayne.

Guji xiriiriyayaashan si aad wax dheeraad ah aad uga ogaato dacwada iyo xukunka.

S: Dugsiyada miyaa si rasmi ah loogu sheegay in la xidhayo?

J: Maya. Xukunka ma hirgalayo illaa 20 maalmood. Dugsiyada, Washington State Charter Schools Association [Ururka Iskuullada Charter School ee Gobolka Washington] (WA Charters), iyo qaar kale oo badan ayaa ku kacaya wax kasta oo suurtagal ah sidii ay uga dhigi lahaayeen dhammaan sagaalka dugsi ee charter schools kuwo furnaantooda ahaada. Dugsiyada kasta muhiimaddiisa ugu wayni—marka hore—waa sidii ay ugu sii wadi lahaayeen tacliiminta 1,300 ee arday iyo sidii ay u yarayn lahaayeen wixii kasta arrimo ka kala-joogsi ku yimaad ardayda iyo qoysaskooda.



S: Haddii dowladda gobolka aysan raasamaalayn u fidin, sidee ayuu dugsiga u furnaan karaa?

J: WA Charters iyo shuraako badan oo kale ayaa baadigoobaya fursad kasta oo muddo-gaaban iyo muddo-dheer ah oo lagaga dhigo dugsiga jaartarka dadwaynu inay sii furnaadaan oo la ilaaliyo awoodda waalidku ku dooran karo dugsiga jaartar dadwayne tayo-sare leh. Arrimuhu wali waa hordhac, laakiin waxaan ku kalsoonahay inaan heli karno wixii kasta ee lacagaha ay dugsiyadu laga yaabaa u baahan karaan illaa xal muddo dheer ah, sida sharci dugsiga jaartar cusub a, meel la dhigi doono.

Waxaan raadsanaynaa fursad kasta oo sharciyeed iyo xeer-dejineed, oo ay ka mid tahay weyddiisi Guddoomiye Gobol Inslee iyo xeer-dejiyayaashu inay qabtaan kal-fadhi gaar ah si arrintan wax uga qabtaan. Guji halkan si aad ugu biiriso codkaaga!

S: Ma sii ogeydeen inay tani dhici karto? Maxaan hadda uun u maqlaynaa xukunkan?

J: WA Charters iyo u doodayaasha kale ayaa difaacay doodaha sharciga Maxkamadda dhexdeeda ku dhawaad hal sano kahor, oo ogaa inay go'aamin kasta suurtagal tahay. Iyada oo salka ku haysay aragtiyo iyo go'aanno ka horreeyay u gudbinta arrinta Maxkamadda Sare ee gobolka, khubaraa sharci ayaa aaminsanaa inayna go'aan sidan oo kale ayna arrimuhu u badnaaan doonin oo haddii ay xukumad ka soo hoorjeeda sharciga dugsiga charter school dadwaynaha ay soo baxdana, inuu noqon doono mid xaddidan, oo ayna saamayn ku yeelan doonin sharciga dhammaantiis. Intaa waxa u dheer, xukun hore oo ka soo baxay Maxkamadda Sare ee King County ayaa tilmaamay in shuruudda raasamaalaynta "dugsiyada caadiga ah" gaar looga dhigi karo waxyaabaha kale ee sharciga jaartarka, oo haddii kalse sideeda loo dayn karo.

Sharciga dugsiga charter schools waxaa ansixiyeen-codbixiyayaashu waxaana loo farsameeyay inuu noqdo mid ka mid ah kuwa ugu xoogga badan ee wadanka ka jira. Ma cadda sababta Maxkamaddu ay go'aankan u gaadhay kaddib markay 9 dugsiga oo charter school dadwayne ay horayba u furnaayeen.

S: Maxaa la samaynayaa si wax looga qabto xukunkan?

J: WA Charters, dugsiyada charter schools iyo kuwa kale oo badan ayaa tilmaansanaya arrimo xallin kasta oo muddo-gaaban iyo muddo-dheer ah oo dugsiyada ay sii furnaadaan oona la ilaaliyo awoodda waalidku ku dooran karo dugsiga charter school dadwayne ah tayo-sare leh.

Muddada gaaban marka la eego, waxaa suurtagal ah in la xereeyo mooshin dib uga fiirsi ah Maxkamadda Sare ee Gobolka loo dirro. Intaa waxaa u dheer, annaga oo ugu baaqayna Guddoomiye Gobol Inslee xeer-dejiyaasha gobolku inay si dhaqso ah ay go'aankan wax uga qabtaan. Waxaa u fiirsanaynaa dowlad fursadood oo kale si loogu dayn lahaa dugsiga charter school dadwayne kasta furnaatiisa iyo in ardayda wax lagu baro.

S: Maxay waalidiintu ka qaban karaan si ay u taageeraan dugsiga ilmahooda?

J: Waalid ahaan, waxaad la wadaagi kartaa arimaha qoyskaaga iyo sababaha aad u dooratay inaad ilmahaaga ku qorto dugsiga public charter school. Haddii aad rabto inaad ku biirto dadaalka loogu jiro #SaveWACharterSchools, ka fikir inaad ka codsato Guddoomiye Inslee iyo xildhibaan gobolkaaga inay qaadaan tallaabo degdeg ah, adiga oo kula wadaaga arrimahaaga warbaahin bulsheedka, adiga oo warqad u gudbiya tafatiraha ilaha wararka ee deegaankaaga, iyo adiga oo dugsiga ilmahaaga dhigto warsada sidii aad caawin lahayd.